

CAYMISKA CHIP EE TENNESSEE

CHIP waa barnaamij caymis caafimaad oo dowladda gobolka-federaalka ah oo loogu talagalay carruurta iyo haweenka uurka leh. Tennessee ayaa maamusha iskujir CHIP oo ay ku jirto CoverKids, CHIP gooni ah, iyo TennCare Caadiga, barnaamijka ballaarinta caymiska Medicaid, boqolkiiba 76.3% ee qarashka waxaa maalgeliya dowladda federaalka iyo boqolkiiba 23.7% waxaa bixisa dowladda gobolka Tennessee.¹

Kongareeska ayaa ansaxiyay deeqda CHIP iyadoo loo mariyay Sanad Xisaabeedka 2027. Qeybta federaalka CHIP ee Tennessee waa 247.9 milyan laga soo bilaabo 2020.²

Xaq u yeelashada

Dowladda Tennessee waxay caymisaa carruurta iyadoo loo mariyo barnaamijkeeda caymiska caadiga ee Medicaid, ee loogu yeero TennCare, kiiba daqligiisu ah ilaa boqolkiiba 195% ee heerka saboolnimada dowladda dhaxe (federal poverty level) (FPL) ee loogu talagalay dhallaanka, boqolkiiba 142% waxaa loogu talagalay carruurta ay da'doodu tahay 1 – 5, iyo boqolkiiba 133% ee FPL waxaa loogu talagalay carruurta ay da'doodu u dhaxayso 6 – 18.

Carruurta xaq u yeelashada TennCare lumiya waxay u qalmaan barnaamij caymis caafimaad oo hoos yimaada Medicaid, oo loogu yeero TennCare Standard, haddii aysan caymis haysan, ayna heli karin caymis, oo daqliga qoyskooduna ka hooseeyo boqolkiiba 211% ee FPL. Carruurta ka badan boqolkiiba 211% ee FPL, waxaa dhici karta inay helaan TennCare Standard haddii ay qabaan xaaladdo caafimaad qaar.

Sidoo kale dowladda gobolka Tennessee waxay haysaa barnaamij CHIP ee gooni ah, oo loogu yeero CoverKids, kaas oo caymiya carruurta aan caymis haysan oo da' kasta isugu jira ee aanu u qalmin TennCare ama TennCare Standard oo daqligoodu ka hooseeya boqolkiiba 250% ee FPL.³

Sababo la xiriira isku darka Suuqa caymiska iyo caymiska loo shaqeeyaha ay bixiyaan ee daqligu koreeyo si qofka uu daqli ahaan ugu qalmo darteed, badankood kuwa la siiyo caymiska CoverKids waxay ka hooseeyaan boqolkiiba 200% ee FPL.

Isku qorista 2019⁴

Barnaamijka	TennCare Standard	CoverKids	Carruurta aan dhalan	Isu-geyn
	11,807	59,562	6,195	77,564

Manfacyada

Gobollada waxay awood u leeyihiin inay qaabeeyaan barnaamijyadooda, oo ayna go'aamin karaan nooca manfac ee la daboolayo oo waxay dejin karaan qaabka qarash wadaagista loogu talagalay kuwa qaata, kaas oo aan noqon karin in ka badan boqolkiiba 5% ee daqligoodu.⁵

CoverKids wuxuu fidiyaa caymis dhammays-tirian oo loo baahan yahay inuu buuxiyo ansaxida Wasiirka Caafimaadka iyo Adeega Aadanaha. Barnaamijka CoverKids ee Tennessee wuxuu leeyahay isla heerarka caymis caafimaad ee ay bixiyaan kuwa shaqaalaha dowladda gobolka oo kale. Caymiska dhammays-tirian ee TennCare Standard wuxuu raacaa isla heerarka dowladda federaalka ee sida caymiska TennCare Medicaid oo kale.

1 <https://www.kff.org/other/state-indicator/enhanced-federal-matching-rate-chip/>

2 <https://www.macpac.gov/wp-content/uploads/2018/05/EXHIBIT-34.-Federal-CHIP-Allotments-FYs-2018%E2%80%932020-millions.pdf> 3 <https://www.nashp.org/tennessee-chip-fact-sheet/>

4 <https://www.macpac.gov/publication/child-enrollment-in-chip-and-medicaid-by-state/>; <https://www.tn.gov/coverkids/enrollment-data-.html>

5 <https://publications.tnsosfiles.com/rules/1200/1200-13/1200-13-21.20180226.pdf>

CHIP wuxuu daruuri ugu yahay carruurta iyo haweenka uurka lehee reer Tennessee.

Maxaad ka qaban kartaa si aad ugu doodo caymiska CHIP?

- 1. Senatarradaada iyo wakiilladaada la socodsii oo ogeysii in aad rabto inay kaa taageeraan ka dhaafida muddada la sugayo ee shanta-sano ee carruurta si sharciga ah u degan oo u fidi caymiska CHIP. Wac 202-224-3121. Sanatarrada, riix 1. Wakiillada, riix 2. Kadibna, gali summadaada boostada (zip code).**
- 2. U qor waraaq aad gacantaada ku qorayso ama iimeel u dir sanatarradaada iyo wakiilladaada si aad ugu wargeliso sababta uu CHIP muhiim ugu yahay.**
- 3. Waraaq u qor tifatiraha wargeyska magaaladdaada qoraal ku saabsan sida CHIP uu u caawiyo dhallaanka iyo carruurta. Fadlan iimeel awalton@tnjustice.org haddii tan aad kaalmo ugu baahan tahay.**
- 4. "Like" noosaar Facebook-ga [Xarunta Caddaaladda ee Tennessee \(Tennessee Justice Center\)](#) oo [Caymi Caruurteena](#).**
- 5. Isku qor si aad iimeel ahaan ugu hesho wixii soo cusboonaada: <http://bit.ly/2iJAUIk>.**

